

Muxuu yahay baaritaanka kansarka mindhicirku?

Ujeeddada baaritaanka kansarka mindhicirku waa in kansarka laga hortago intuusan dhalan ama la ogaado intuu bilowga yahay oo ay daawayntiisu sahlan tahay.

NHS waxay dadka u dirtaa baaritaan saxaro oo bilaash ah (FIT) oo aad sambal saxaro oo yar isaga qaadayso. Saxarada ayaa shaybaarka la geeyaa si wax dhiig ah looga baaro.

Dhiiggu wuxuu calaamad u noqon karaa buro ama kansarka mindhicirka. Buradu mindhicirka ayay ka soo baxdaa, taasoo muddo ka dib kansar isu beddeli karta. Haddii baaritaanka wax aan caadi ahayn lagu arko, baaritaan dheeraad ah ayaa laguuri diri karaa.

Da' kastoo aad jirtid, haddii aad isku aragtid calaamadaha kansarka mindhicirka u tag dhakhtarkaaga (GP), xataa haddii aad dhowaan baaritaan martay.

Maxaa dadka looga baaraa kansarka mindhicirka?

Kansarka mindhicirku wuxuu ka mid yahay kansarrada aadka loo yaqaan, waxaana looga hortegi karaa in si joogto ah la iska baaro ama in la ogaado inta uu bilowga yahay oo ay daawayntiisu sahlan tahay.

Yaa loogu talagalay baaritaanka kansarka?

Qof kasta oo da'diisu u dhexeyso 56 – 74 ayaa loogu talagalay. Marka aad da'daas gaartid, 2 sano oo kasta qalabka baarista ayaa laguuri soo dirayaa. Mar kasta oo qalabka laguuri soo diro waa inaad isticmaashaa.

Sidee ayaan ku heli karaa baaritaanka guriga lagu sameeyo?

Qof kasta oo England ku nool oo dhakhtar (GP) ka diiwaangashan, si toos ah ayaa qalabka baaritaanka cinwaanka gurigiisa looguuri soo dirayaa.

Goormaa la ii soo jawaabayaa?

2 toddobaad gudohood ayaa jawaabta boostada laguuri soo dirayaa. Haddii aad baaritaano dheeraad ah u baahan tahay waa laguuri sheegayaa. Baaritaanka dheeraadka ah macnihiisu ma aha oo kaliya inaad kansarka mindhicirka qabtid.

Ha iska indhotirin inaad iska baarto kansarka mindhicirka


Khad Gargaar oo Bilaash ah:
0800 707 6060

Screening
saves
lives

Help us
help you

Sida loo isticmaalo qalabka baaritaanka kansarka mindhicirka

1. Taariikhda maalintaas ku qor dhalada sambalka dusheeda
2. Ku qaad saxarada, weel ama lakabyo xaashida musqusha ah
3. Ka ilaali in saxaradu ay biyaha musqusha taabato
4. Wareeji furka si aad dhalada sambalka u furtid
5. Si aad samblka saxarada u qaaddid, caagga dheer dhexgeli saxarada ilaa dhinacydoo dhan ka qarsoomaan.
6. Saxaro yar ayaa loo baahan yahay. Fadlan ha badin saxarada



7. Ku celi caagga dheer dhalada oo tuuji furka si aad dhalada u xirtid
8. Dhalada mar haddii aad xirtid dib ha u furin
9. Marka aad dhalada xirtid, fadlan gacmaha dhaqo
10. Ku rid dhalada sambalka boqshadda I agu celinayo
11. Fur sharootada, ku xir boqshadda oo boostada ku soo dir
12. Labo toddobaad gudohood ayay jawaabta baaritaanku kuugu imaanaysaa



Ha iska indhotirin inaad iska baarto kansarka mindhicirka.

Haddii uu qalabku ku soo gaaro, fadlan isticmaal oo sida ugu dhakhsaha badan dib ugu soo dir.

